



U gudbida UK waa mid aad u halis badan; macluumaadkan wuxuu badbaadin karaa nolashaada.



Ha iskudayin adigoon haysan matoor.



Ka digtoonow ceeryaamo iyo dabayl ka badan 10 knots.



Ka fogow maraakiibta. Waxay sameeyaan hirar waaweyn mana arkaan Qofka u ag dhaw.



Ha isku dayin haddii hirarku ka sarreeyaan 0.5 mitir.



Waligaa ha ka bixin doonida ama ha isku dayin inaad dabaalatid



Badda, waa qabow oo waxaa jira dabaylo ka badan kuwa dhulka.

Iska hubi cimilada iyo hirarka adiga oo adeegsanaya WINDY ka hor intaanad ka tagin. Kaleebka wuxuu qaadan karaa 8-10 saacadood, waxaana cimiladu si degdeg ah isu beddeli kartaa.



- **112 wuxuu shaqayn doonaa xitaa haddii telefoonkaagu aanu lahayn Shabkad ama ateeno**
- **Waa inaad tiraahdaa: Waxaan ku suganahay badda oo waxaan u baahanahay in la badbaadiyo.**
- **Haddii aad haysato shabakad Faransiis, wac 196 si toos ah ula hadal ilaaliyaha xeebaha Faransiiska.**

MACLUUMAD DHEERADA

Badbaadada badda iyo diyaarinta safarka

Cimillada Dooxada Dover

Magangaliyada uk

t.ly/z7hb




Sida loo diro goobtaada GPS marka aad u wado caawimo?

Marka hore, hubi in goobtaada (location) ay **ON** ku jirto dejinta (settings).




X **LANA XIRIIR ama xog:** GPS wali wuu shaqeeyaa walina waad wici kartaa 112!


1 Fur Google Maps ama mid la mid ah. Taabo badhanka bartilmaameedka (target button).
Way qaadan kartaa waqti, laakiin booskaaga wuxuu soo bixi doonaa sidii dhibic buluug ah. Xitaa badda dhexdeeda, tani waa booskaaga saxda ah.



2 Riix oo hay dhibicda buluugga ah si aad ugu dejiso «dhibic cas» booskaaga hadda.




3 Iskuday inaad raadiso koordinates-ka GPS-kaaga oo ah meel u dhow dusha shaashadda. Haddii aysan soo bixin, hoos u rog si aad u raadiso.




4 Sii tirooyinkan markaad caawimaad dalbanayso. Ku dheh dhammaan tirooyinka iyo calaamadaha si tartiib ah oo cad (-, ', °).

Iyadoo la adeegsanayo Signal iyo xogta (data), isticmaal WhatsApp si aad u dirto goobtaada (location)

1 Qoraalka qofka aad rabto inaad u dirto goobtaada, taabo astaanta 'warqadda ku dheggaan' (paper clip).



2 Taabo astaanta goobta (location)



3 Dir goobtaada hadda (current location), MA AHAN 'goob nololeed' (LIVE location).

4 Share live location

Nearby places

5 Send your current location
Accurate to 13 meters



Had iyo jeer wac lambarka 112 marka hore. Haddii gurmada uusan imaanin ama lagugu celiyo, waad wici kartaa **Alarm Phone 00 33 4 86 51 71 61**